

# Maaraynta jirada dugsiyada iyo ilmanimada hore

Mid ka mid ah waxyaallaha ugu muhiimsan oo aan samayn karno si hoos loogu dhigo fiditaanka (COVID-19) bulshadeena dhexdeeda waa in aan guriga joogno marka aynaan fiyoobayn, xataa haddii aan qabno astaamaha ugu sahlan.

## Waxaad u baahan tahay inaad ogaato

Haddii ilmuhu aanu fiyoobayn, xataa astaamaha ugu sahlan, waxaa waajiba inay gurigan joogaan

Haddii ilmo jiran yahay maalinimada, waa in dugsiya/waxbarashada ilmanimada hore (ECEC), waa guriga laga soo qaadaa lana daryeellaa laga soo qaadaa lana daryeellaa sida ugu dhaqsahaha badan.

**Haddii ilmo leeyahay astaamaha coronavirus (COVID-19) ee hoos lagu sharxay, si kasta ha u sahlanaatee, waa in la baaraa waana inay guriga joogaan ilaa ay ka hellaan natiijadooda:**

- qandho
- qabow ama dhidid
- qufac
- cuna xanuun
- neefsiga oo kugu adag
- sanko oo biya ka socdaan
- urka ama dhadhank oo kaa luma.

Xaalladah qaarkood madax xanuun, sanko oo ku cabursan, yaqyaqsi, hunqaaco iyo shuban ayaa iyagana loo arki karaa inay yihiin astaamaha.

Tala intaas ka badan:

- wac 24ka saac khadka coronavirus-ka (COVID-19) oo ah 1800 675 398
- wac dhakhtar guud
- isticmaal Department of Health (DHS) qalabka iska baarista online-ka ah [aallada isqiimaynta online-ka ah](#).

Booqo: Meesha la iskaga baaro [Meesha la isku baaro](#).

**Ilmuhu waa inuu guriga joogaa ilaa astaamaha laga waayo, xataa haddii coronavirus (COVID-19) aan laga helin.**

Haddii qof laga helay coronavirus (COVID-19) ama lagu sheegay qof u dhow waxaa waajiba in la gooni-yeello/karantiino ilaa ay ka hellaan DHS cadayn ah in aan waxba jirin.

Carruurta leh astaamo aan tegayn iyada oo ay sabab u tahay waxyaallaha muuqda sida xumad ama neef astamaahaas oo aad ula mid ah xaalladooda waxay sii wadi karaan inay tagaan dugsiga/ECEC. Waxaa waajiba in laga baaro astamaha COVID-19 haddii ay yeeshaan astaama ka duwan ama ka daran astamahooda caadiga ah. Waa inay ka fekeraan inay hellaan shahaadada dhakhtarka guud si ay u tagaan ECEC/dugsiga haddii ay leeyihiin astaama aan tegayn kuwaas oo u eg astaamaha COVID-19 sida qufac ama sanko oo biya ka socdaan.

Carruurta yaryar (dugsiga ka hor ilaa heerka 2aad) waxaa laga yaabaa inay leeyihiin astaama sii daba dheeraaday oo fayraska sida sanko oo biya ka socdaan ama qufac waxaana laga yaabaa inay dugsiga/ECEC ku noqdaan ka dib marka laga waayo COVID-19 xataa haddii aanay weli ka dhamaan astaamuhu. Waxay u baahan doonaan shahaadada dhakhtarka guud si uu ta'kiidiyo inay fiican yihiin ama ka soo ladnaadeen jiradoodu aadka u darnayd.

Macluumaadka mudada ugu yar ee ardada iyo carruurta yaryar waxay u baahan yihiin inay joogaan guriga xaallada kale, eeg [DHS jadwalka ka baxsan dugsiga](#).

### **Carruurta UMA baahna shahaadada caafimaadka ka hor inta aanay ku noqon dugsiga/ECEC.**

Marka astaamaha laga waayo, loogama baahna Department of Education and Training ama ilmaha/ardadu inay hellan shahaadada caafimaadka ka hor inta aanay ku noqon dugsiga/ECEC.

### **Waad ku mahadsan tahay kaalmadaada talaabooyinka soo socda, wadajir ahaana waxaan ahaanaynaa kuwa amaana.**

Talada waxaa soo diyaarisay Department of Education and Training, Safer Care Victoria iyo Department of Health